

Tirakoobka 2020-ka iyo Qarsoodiga Jawaabaha

Jawaabahaaga ku aaddan tirakoobka 2020 waa kuwo qarsoodi ah, waxaana dhowraya sharciga federaalka. Jawaabahaaga waxa keliya oo loo isticmaali doonaa si loo soo saaro tirakoob wax lagu qiyaaso-marnaba looma isticmaali doono wax adiga kugu lid ah. Sida sharcigu dhigayo, dhammaan jawaabaha uu helo Xafiiska Tirakoobka ee xog ururinta qoysaska iyo ganacsiyada cidna lalama wadaagayo.

Kasoo Jawaab Tirakoobka 2020-ka si loo Qaabeeyo Mustaqbalka.

Ka soo jawaabidda tirakoobka waxay wax ka tartaa in bulshadu ay helaan deeqaha ay u baahanyihiin, waxay kaloo wax ka tartaa in la gaadho go'aamo xog ku salysan oo kobciya dhaqaalaha. Xogta tirakoobku waxay saamay ku leedahay nolol maalmeedkeenna, waxaynu ka ogaanna sidaynu u go'aamin lahayn kharashaadka adeegyada iyo kaabayaasha bulshada, sida caafimaadka xanaanada waayeeelka, shaqada, metelaadda siyaasadda, jidadka, dugsiyada iyo ganacsiyada. In ka badan \$675 Bilyan oo ah kharashaadka dawladda dhexe waxay dib loogu soo celiyaa dawlad-goboleedka iyo bulshooyinka degaanka sannad kasta iyadoo lagu jaangoynayo xogta tirakoobka.



Jawaabahaaga Tirakoobku waa Ammaan Sugaan.

Sharciga ayaa faraya in Xafiiska Tirakoobku ilaaliyo xogaha gaarka ah ee aan annagu ka qaadno qof kasta, si adag baana loogu ilaalinayaa si aan cid kale u ogaan. Xafiiska Tirakoobku waxuu jawaabahaaga u isticmaalaayaa oo keliya tirakoob ahaan. Xaqiiqdii, qofkasta oo ka shaqeeya Xafiiska Tirakoobka waxaa lagu dhaariyaa inuu si sir ah u ilaaliyo xogtaada weligiis inta uu nool yahay. Jawaabahaaga looma isticmaali karo inay adeegsadaan hayadaha sharcigafuliya, ama ku go'aan qaadashada xaq u lahaanshadaada gargaarka dowlada.

Sharci ahaan, Jawaabahaaga Tirakoobka Looma Adeegsan karo si Adiga Kugu Lid ah.

Sida sharcigu qabo, jawaabahaaga tirakoobka marnaba ma adeegsan karto hayad dawladeed aama maxkamad - ma adeegsan karaan dhamaan Xafiiska Dawlada Dhexe ee Dabagalka ee Federaalka (FBI), Hay'ada Sirdoonka Dhexe (CIA), Waaxda Nabadsugida Qaranka (DHS), Xoogaga Waaxda Socdaalka ee Mareykanka (ICE). Waxa sharcigu farayaa Xafiiska Tirakoobka in uu xogtaada si adag u dhawro oo aan cidna lala wadaagin, loona isticmaalo tirakoob ahaan keliya.



Sharcigu waa cad yahay-xog-Shakhsiyeed gaar ah lama wadaagi karo.

Sida uu dhigayo Faraca 13-aad ee Xeerka U.S., Xafiiska Tirakoobku uma sii dayn karo wax xog cayiman ah oo ku saabsan shakhsiyaad, qoysas, ama ganacsiyo, xitaa haddii ay noqoto laamaha amaanka iyo sharciyada.

Waxuu sharcigu qeexayaa in xogta la ururiyo loo isticmaali karo qasdiga tirakoobka oo keliya.

Si loogu adeegsado cilmi-baaris taariikhi ah, Faraca 44-aad ee Xeerka U.S. waxuu u ogolaanayaa Maamulka Kaydka Diiwaanada Qaranku inay xogta tirakoobka ee shakhsiga lasii daayo 72 uun ka bacdi.

Dhamaan shaqaalaha Xafiiska Tirakoobku waxaa lagu dhaariyaa inay xogta shakhsiga ilaaliyaan intay noel yihiin weligood. Haday taas ku xad gudbaan waxay mutaysanayaan ganaax dhan ilaa \$250,000 iyo/ama xarig dhan ilaa iyo shan sanadood.

Cidna Kama Reebana Sareynta Sharcigu.

Waxaa sharcigu ku waajibinayaa Xafiiska Tirakoobku inuu xogta qof walba xafido oo aan cid lala wadaagin. Sida sharcigu qabo jawaabaha qofku bixiyo hay'adaha dawladda iyo maxkamaduhu toonna uma adeegsan karaan wax adiga kugu liddi ah siday doonto ha ahaatee. Xafiiska Tirakoobku jawaabaha qofka lama wadaagi karaan hay'adda socdaalka, hay'adaha sharcifulinta, sidoo kale xogta qofka looma adeegsan karo in go'aan lagaga gaadho xaq u yeelashada gargaarka dawladu u fidiso danyarta. Qodobka 13 ayaa si cad u qeexaya in xogta qofka laga soo ururiyey loo isticmaali karo arimo tirakoob oo keliya- lama aqbali karo in loo isticmaalo wax ka baxsan arrinkaas, iyadoo laga reebayn laamaha sharciga.

Sidii aad door bidaysid: Jawaabaha si sugan ugu bixi khadka-internetka (online), email ama telefoonka hadba sidii aad jeceshahay.

Waxaad kala dooran kartaa qaabab kala geddisan oo aad jawaabahaaga ku bixisid, sida khadka-internetka, email ama telefoon. Qoyskii/qofkii aan noocyadan kusoo jawaabin waxa guriga ku soo booqanaya shaqaalaha Xafiiska Tirakoobka si ay xogta si toos ah uga soo urursadaan. Nooe kasta oo aad jawaabahaaga u bixisis xogtaada ilaalinteeda waxa damaanad qaadaya sharci dalka u yaal.

Jawaabahaaga khadka-internetka waa ka ammaan in la jabsado tuugada ka ugaadhsata online-kaba.

Xafiiska Tirakoobku wuxuu taxadar dheeriya ka muujinyaa sidii jawaabaha lagu bixiyo khadka-internetka ammaan u ahaan lahayeen. Dhammaan xogta online-ka ku timaadda waa la maldahayaa si loo ilaaliyo xogta jawaabaha, waxa xafiiska tirakoobku leeyahay hab casriya oo heersare ah oo looga hortago tuugada ka ugaadhsata internetka si loo ilaaliyo xogta qof kasta. Marka jawaabuha online-ku soo gaadhaan xafiiska tirakoobka ayaa ugu danbaysa online-nimadooda. Marka ugu horreysa ee xogtu xafiiska kusoo dhacdo waxaa xafiisku diiradda saaraa iskuna waajibiyaa in lagu kaydiyo meel ammaan ah oo aan loo gacandhaafi karayn.

Waxa naga go'an qarsoodiga xogtaada.

Haddaanu nahay Xafiiska Tirakoobka Maraykanka waxa naga go'an inaanu ilaalinno jawaabahaaga. Ballanqaadkayagan adagi waxa ujeeddadiisu tahay inaad ogaatid in jawaabaha aad na siin doontaa gacan aammin ah gelayaan, jawaabahaas waxa loo isticmaalayaa in lagu soo bandhigo boodhadh loogu talo galay in laga daalacdo qiyaas-qorsheedka bulshooyinka kala geddisan iyo tan qarankaba.

Wax ka ogoow Xafiiska Tirakoobka iyo ilaalinta xogaha shakhsiga shabakaddan www.census.gov/privacy.



Sharciyada ilaaliya xog-shakhsiyeedka tirakoobka hore ayaa wax looga qaadi waayey.

Sanandkii 1982-dii, ayaa Maxkamada sare ee Mareykanku meelmarisay in xitaa cinwaanadu ay yihiin qarsoodi lana sheegi karin xitaa haddii loo maro sifo sharciyeed ama Xeerka Madaxbanaanida Xogta (FOIA). 2010-kiina waxay Waaxda Cadaaladu qeexday in Xeerka Waddaniyadu uusan burin karin sharciga ilaalinaya xogta shakhsiga tirakoobka ka jawaabaya. Ma jirto maxkamad sabiina u jari karta qof tirakoobka jawaabo ka bixiyey.